

JAMHURIYADDA  
SOMALILAND



REPUBLIC OF  
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA  
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النّشرة الرّسمية لجمهوريّة صوماليّلاند

Sannadka Saad


Cadad Gaar ah

1/9/2016

XEER HOOSAADKA GOLAHA GUURTIDA

Email: garyaqaankaguud@gmail.com  
Web. www.garyaqaankaguud.com

# Golaha Guurtida



## XEER-HOOSAADKA

**UJEEODO:** Xeer Hoosaadka Golaha Guurtida.

**Markuu arkay:** Qodd: 57aad & Qodd: 60aad ee dastuurka JSL

**Markuu Tixgaliyay:** Jamhuuriyadda S/land oo Qaadatay Nidaamka Siyaasadeed ee ku dhisan Talo-wadaag iyo Dimoqraadiyad.

**Markuu Aqoonsadey,**

**Iskuna Qanciyay.** In Golaha Guurtiddu kamid yahay tiirarka ay waajib tahay inuu hawlihiisa ku fuliyo hab aan mad-madow & muran gali Karin.

**WAXA UU SOO SAARAY XEER-HOOSAADKAN.**

### TILMAANTA GOLAH

**QODD: 1AAD:** Golaha Guurtidda

Jamhuuriyadda Somaliland, waa Hay'ad Xeer dajineed, Nabadgelyo, dhaqan iyo Diineed oo xil gudashadiisu ku salaysan tahay fulinta mabaa'dida & waajibaadka

dastuuriga ah & xeer-hoosaadkiisa, xilna ka saran yahay xogogaal u noqoshada xaalada guud ee dalka.

### **ASTAANTA GOLAHA**

#### **QODD: 2AAD: Astaata Golaha Guurtiddu**



Waa geed ay ka muuqato salkiisa laba gacmood oo isasalaamaya, uuna hoos yaalo kitaab quraan ah oo furan oo kor saran Rixli.

### **QAAB-DHISMEEDKA GOLAHA**

**QODD: 3AAD:** iyada oo Qoddobka 60aad uu qeexayo tirade guud ee xubnaha Golaha, isla markaana uu **Goluhu** iska dhex-dooranayo Guddoomiyaha iyo labada Guddoomiye Ku-xigeen (Shir-Guddoonka), Guddiga Joogtada ah & Guddi-hoosaadyo, waxa kale oo uu Goluhu yeelanayaa Xoghayn Guud oo ka tirsan **Golaha** & Xeer-hoosaadkeedaba.

### **SHIR-GUDDOONKA.**

**QODD: 4AAD:** Iyada oo shir-guddoonku ay leeyihiin awoodahooda dastuurku siiyay, waxa xeer-hoosaadkani u banaynayaa: -

- b. Inay leeyihiin awooda furista & xidhista shir-kasta oo u qabsooma **Golaha Guurtidda.**
- t. Hogaaminta shirka caadiga ah & kana aan caadiga ahayn ee **Golaha Guurtiddu.**
- j. Inay soo diyaariyaan miisaaniyada **Golaha** iyaga oo kala-tashanaya Guddiga dhaqaalaha ee **Golaha Guurtidda.**

x. Inay u xulaan **Golaha** saraakiil aqoon fiican u leh xilka jagooyinka kala ah Xoghaye Guud, Ku-xigeenka xoghayaha & la taliyaha sharciga.

Kh. Inay u magacaabaan xubno ka tirsan **Golaha** hawlo la xidhiidha Dalka Gudihiisa & Dibadiisaba.

d. Inay soo xulaan xubnaha Guddiga joogtada ah ee **Golaha** Goluhuna ansixyo

**QODD: 5AAD:** Waxa xubin kasta oo ka mid shir-Gudoonka xilka lagaga qaadi karaa marka ay soo jeediyaan 1/3 xubnaha **Golaha** 2/3 xubnaha **Goluuhu** u codeeyaan xilka qaadista. Shir-gudoonka waxa tahay waajib ku ah marka mudanayaasha tiradoodu kor ku sheegan ay qoraal ugu soo gudbiyaan soojeedintooda inay coddantu u mudeyaan.

### **GUDDIGA JOOGTADA AH**

**QODD: 6AAD:** Xubnaha Guddiga joogtadu waxay ka kooban yihiin (25) xubnood, wuxuuna xeer-hoosaadkani siinayaan: -

b. Fulinta hawlaha **Golaha** ee mudadda labada kal-fadhi dhexdoodaa.

u. Xalinta tabashooyinka & khilaafka ka dhex-oogma **Golaha**.

J. Soojeedinta waxkabadalaada lagu sameyn karo Qoddobada xeer-hoosaadka **Golaha**.

v. Soo diyaarinta war-bixinta & wax-qabadka Guddiga ee mudada udhaxaysa labada kal-fadhi.

### **GUDDI-HOOSAADYADA GOLAH**

**QODD: 7AAD:** Guddii-hoosaadyada **Goluhu** waxay ka kooban yihiin:

- Guddiga Nabad-gelyada & Difaaca
- Guddiga Siyaasada
- Guddiga Dhaqaalaha
- Guddiga Arrimaha Bulshada
- Guddiga Shuruucda iyo Garsoorka



Guddi-hoosaad kasta tiradoodu kama badnaan karto (16) xubnood, iyada oo Guddi kasta iska-dhex magacaabayso Gudoomiye & Xoghaye.

b. Guddi-hoosaadyada **Goluhu** way hawl-gali karaan wakhti kastaba oo loo baahdo.

t. Xubinta ka maqnaata saddex fadhi oo isku-xiga idan la'aan waxa Guddoomiyaha Guddigaasi la socodsiinayaay Shir-gudoonka oo awood u leh inuu siiyo digniin, mar labaadkana kajoojiyo Guddiga **Golaha**.

J. waxa Guddi kasta waajib ku ah inay war-bixin billeed kasoo diyaariyaan hawlaha loo xil saaray.

### **XOGHAYNTA GOLAH**

**QODD: 8AAD:** Ka sakow mas'uuliyyada ku cad Qodd 63aad & 52aad ee Dastuurka, waxa kale oo waajib ku ah xoghaynta in xubin ama xubno ka tirsani ka qayb galaan shir-kasta oo u qabsooma **Golaha** si ay u diiwaangeliyaan doodaha, soo jeedimaha, is-weydiimaha & go'aamada **Goluhu** gaadho. Waxa xoghaynta **Goluhu** xil ka saran yahay xafidaadooda Documentisyada & qoraalada la xidhiidha Golaha, isla markaana waxa mas'uuliyyad gaar ahi ka saran tahay inay u aqoonsadaan

wixii ay shaqadooda ku ogadaani inay tahay sir, cidii faafisaana mas'uuliyad ciqaabeed mutaysanayso.

### **XUQUUQDA XUBINTA.**

**QODD: 9AAD:** Marka laga reebo xuquuqda uu siinayo Qodd 79aad ee Dastuurka & xuquuqda ku qeexan sharciga muunaynta Saddexda Gole Qaran (**SHARCI NO 21**) **ee 18/12/1995** waxa xubinta laga kaalmayn karaa marka ay ku timaado dhibaato culusi sida Geeri ku timaada isaga, Xaaskiisa iyo Bukaan jiif dheer oo ugu yaraan saddex bilood ah.

**QODD: 10AAD:** Sanduuq kaalmo ayuu **Goluhu** yeelanaya oo xubnaha & shaqaalaha ay ku timaado sifaha dhibaato eek u cad Qodd. 9AAD laga caawinayo. Sanduuqaasi waxay lacagtiisu ku imanaysaa dhigaal bileed oo ay bixinayaan xubnaha & shaqaalaha **Goluhu** & wixii kabid looga heli karo miisaaniyada **Golaha**

**QODD: 11AAD:** cadadka lacageed ee dhigaalka (Sanduuqa), goyntiisa & maamulka sanduuqaba waxa yeelanaya mas'uuliyad ahaan Guiddi-hoosaadka

### **LUUQADA**

**QODD: 12AAD:** luuqada rasmiga ah ee loo adeegsanayaan socodsiinta shirka & maamulka **Goluhu** waxa weeye AF-Somaali maamulka Goluhu uu adeegsan karaa luuqadaha kale ee loo baahdo.

### **FADHIYADA & KAL-FADHIYADA GOLAH**

**QODD: 13AAD:** Waxa **Golaha Guurtidu** yeelanayaan saddex (3) kal-fadhi oo caadi ah sanadkiiba, oo qaadanaya muddo sadex & labaatan todobaad, labadii kal-fiyadhiba waxa u dhixeyya afar (4) todobadaada, ilaa sided (8) todobaad.

**QODD: 14AAD:** waxa uu **Golaha Guurtidu** yeelan karaa kal-fadhi aan caadi ahayn, waxaana uu fadhigaasi ku qabsoomi karaa: -

- ✓ Codsi ka yimaada Madaxweynaha.
- ✓ Guddoomiyaha Golaha oo isugu yeesha.
- ✓ 1/3 xubanaha Golaha oo qoraal kusoo cadsada



**QODD: 15AAD:** Fadhiyada-Goluhu waxa ay ku furmi karaan, marka ay joogaan kala badh in ka badan tirada guud ee xubnaha, marka laga reebo kuraasida banaanaanshahooda la baahiyay. Waxa **Goluhu** Go'aamadiisa ku ansixinayaa cod hal dheeri ah ee xubnaha jooga fadhiga.

**QODD: 16AAD:** Fadhiyada **Golaha Guurtida** waa kuwa furan, waxayna noqon karaan qaar xidhan iyada oo uu Gudoomiyuhu ka cadaynaayo soo jeedintiisa, **Goluhuna** aqbalayo.

**QODD: 17AAD:** Fadhi kasta oo **Goluhu** u qabsooma waxa waajib ah in lagu furo aayado quraanka kariimka ah, isla markaana shir-socda wakhtiyada salaadu soo gasho la hakiyo ilaa inta mudanayaashu ka tukanayaan.

### **HAB-MAAMULEEDKA SHIRKA**

**QODD: 18AAD:** waxa reeban in dhismayaasha **Goluhu** ku shaqeeyo (XAFIISYADA, QOLALKA SHIRKA) lala soo galo Hub nooc uu yahayba, ciidamada amaanka ee la shaqeeya **Goluhu** ayuuna u sii dhiibayaa ilaa uu ka soo laabanayo dhismayaasha **Golaha**.

**QODD: 19AAD:** Mudanayaasha doonaya in ay dood ka jeediyaan **Golaha** waxa ay magacyadooda ka diiwaan-

galinayaan Xoghaynta **Golaha** marka ay ajandaha fadhiga ogadaan.



**QODD: 20AAD:** Shinku inta uu socda, Hoolka shirka laguma cabi karo Sigaar.

**QODD: 21AAD:** Ma banaana in Mudane **Golaha** ka soo jeediyohadal, iyadoo aanu ogolaansho ka helin Guddoomiyaha.

**QODD: 22AAD:** Xubinta Guddoomiyuhu u ogolaado hadal, waxa waajib ku ah inuu istaago, gaadhsiyo **Golaha**.

**QODD: 23AAD:** Mabanaana in xubini mar wax ka badan dood socota ka qayb gasho, iyadoo uu u ogolaado Guddoomiyuhu, in Mudanuhu caddayn ku sameeyo hadal uu hore u yidhi mooyaane.

**QODD: 24AAD:** Haddii Mudane **Golaha** kaga doodo hadalo aan munaasib u ahayn madasha ama ka baxsan dooda, waxa uu Guddoomiyuhu xaq u leeyahay in uu ku soo celiyo mawduuca, mar labaadkana u digniin siyo, mar sadexaadkana ka joojiyo hadalka.

**QODD: 25AAD:** Haddii Shirka khal-khal la galiyo, hogaamintuna faraha ka baxdo, waxa uu Gudoomiyuhu xidhaya shirka iyada oo uu hadalada taagnaan ku sheego.

b. Haddii ay khal-khalka kiciyeen xubno **Golaha** ka tirsan, waxa uu Guddoonku magacaabayaa Guddi baadha, talana ka soo jeediya, iyadoo ay u banaan tahay in ay u gudbiyaan Guddoonka, haddii ay go'aan qaadashadooda uga maarmi-waayaan.

t. Haddii xubno ka mid ah dadweynaha lagu soo eeddeeyo in ay lug ku lahaayen khal-khal galinta shirka, waxa

ciidamada Nabad-gelyada waajib ku ah, in ay ka qaadaan talaabo sharciga waafaqsan, ka dib marka uu Gudoomiyaha **Goluhu** ku hawl-galiyo.

**QODD: 26AAD:** Iyadoo ka maqnaanshaha fadhiyda lagu muujin doonon diiwaanka xadiriska Mudanayaasha, waxa xubinta ka maqnaata fadhi, iyadoo aan ka haysan iddan xafiiska Shir-Guddoonka: -

- b. Maalinta 1aad waxa la siinayaa digniin af ah.
- t. Maalinta 2aad digniin qoraal ah.
- j. Maalinta 3aadna waxa lagu soo dhigayaa looxa ogaysiiska

X. Maalinta 4aadna waxa Guddoonku u saarayaa Guddi go'aan ka gaadha.

**QODD: 27AAD:** Hoolka shirarka marka uu shirku ka socdo, ma soo gali karaan ciidamada amaanku haddii aan la codsan.

**QODD: 28AAD:** Habka codaynta **Goluhu** waa gacan tag.

### **MASHRUUC SHARCI, SOO WEYDIIMAHAYO BAADHISTA.**

**QODD: 29AAD:** Mudanayaashu way soo jeedin karaan mashruuc sharci amaba mooshin cusub, Tirada ugu yare e ka tirsan xubnaha **Golaha Guurtida** ee so bandhigi karta waa 11 (kaw iyo tobant) xubnood.

**QODD: 30AAD:** ku dhaqanka **Golaha** ee hab-raaca xeer-dejintu waa sida ku cad qodobada 77aad iyo 78aad ee Dastuurka JSL.

**QODD: 31AAD:** Mudanaha **Goluhu** waxa uu soo jeedin karaa khudbad qoran oo ugu badnaan qaadan karta 30

daqiiqadood, iyadoo Gudoonku ogolaansho siinayo, xoghayntana loo gudbinaya nuql khudbad ah ka hor intaan ogolaanshaha la siin.



**QODD: 32AAD:** wixii mashruuc-sharci ah ee loo soo gudbiyo **Golaha**, waxa waajib ah in Mudane kasta helo 24 saacadood ka hor intaan doodiisa la bilaabin.

**QODD: 33AAD:** Iyada oo la fulinayo, lana tixgelinayo mas'uuliyadda Qaranka waxa **Goluhu** awood u leeyahay, u yeedhista madaxda wasaaradaha, Hay'addaha & waxka waydiinta gudashada xilkooda

**QODD: 34AAD:** **Goluhu** wuxuu awood u leeyahay in uu magacaabo, dirana guddi hubin &baadhiseed oo **Golaha** u keenta Xog & Maclumaad dhaba (fact finding mission) ah, waxaana loo magacaabayaa xubno xirfad u leh arrintaasi.

**QODD: 35AAD:** Wax-ka-bedelka, su'aalo, jawaabahooda & soo jeedimaha la xidhiidha Barmaanijyada **Golaha**, waxa uu Shir-Guddoonku u cayimayaa maalin gaara.

**QODD: 36AAD:** Xeer-hoosaadkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka **Golaha Guurtidu** aqlibiyad ku ansixiyo, Gudoomiyuhuna uu saxeexo.

**F/Gaara:** - Xeer-hoosaadkani qoddobkii ka hor imanaya Dastuurka, waxba kama jiraan ayuu yahay.

## **JAMHUURIYADA SOMALILAND**

### **GOLAHA GUURTIDDA QARANKA**

KU: Dhamaan Xubnaha ka soo Qayb-galaya Kal-fadhiga Lixaad ee **Golaha Guurtida** Qaranka



### **UJEEDDO: SOJEEDIN WAX-BEDELIDDA XEER-HOOSAADKA GOLAHA GUURTIDDA (AMENDMENTS).**

**Madanayaal,**

Guddigga Jootaddu, isaga oo tixraacaya qoddobka lixaad (6aad) xarafkiisa (j), waxa u dib-u-eegis ku sammeeyey xeer-hoosaadka **Golaha Guurtida**, waxaanu halkani idiinku soo gudbinayaa qoddobada ula muuqaday in isbeddel lagu sammeeyo.

Arrintu iyada oo ah soo-jeedin, waxa ay hortaal **Golaha** oo leh ogolaanshaha rasmiga ah.

Qoddobadii Guddiga ula muuqatay in isbeddel lagu sameeyana waxay ay ku lifaaqan yihiin halkan.

### **ALLAA MAHAD LEH**

### **GUDDIGA JOOGTADA EE GOLAHA GUURTIDA JSL**

#### **F/gaara:**

Goluhu wuxuu ku ansixiyay Go, aan Lambar GG/JSL/K-F6AAD/GO'AAN-02/98 Wax-ka-beddelka Xeer-Hoosaadka kuna Taarikhaysnayd 27/10/1998

### **GUDDI-HOOSAADKA GOLAHA**

Waxa lagu korodhiyey tirada Guddiyada uu yeellanayo sidani & xarfahani (X) &(KH)&(D) (ADHOC COMMITTEE), 00 loo magacabo hawlo gaar ahaaneed marki loo baahdo.

x. Guddiga Joogtadda & Guddi hoosadyada **Golaha**, muddada xilkoodu wuxuu ku xidhnaan doona wax-qabashadooda, iyadoo Shir-Guddoonku wax ka beddeli karaan xubnaha Guddiyadaasi, haddii ay u arkaan in aanay xilkooda guddan, iyago tixgelinaya war-bixinta madaxda Guddiyadaasi, haddii ay u arkaan in aanay xilkooda guddan, iyagoo tixgelinaya war-bixinta Madaxda Guddiyashaasi.

Kh. Xubnaha Guddiyadaasi, xilka xulistrooda waxa iska leh shir-Guddoonka, iyaga oo tix-gelinaya aqoontooda cilmiyeed &waayo aragnimda xubintu u leedahay hawsha loo xilsaaray.

d. Shir-Guddoonka ayaa qoraal faah-faahsan ku soo saaraya waajibaadka shaqo ee Guddi-hoosaadyadda Golaha.

**QODD: 11AAD:** waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo sidani: - Cadadka Lacageed ee Dhigaalka (SANDUUQA) bileed, waxa Mudane kasta laga goynayaa oo uu bixinayaa 10,00 shilin S/land ah bishiiba. Lacagtaasi waxa lagu bixin karaa oo keliya sida ku cad Qodd. 10aad, waxaana maamulkiiisa leh Guddiga Dhaqaalaha ee **Golaha Guurtidda**, marka **Goluuhu** ansixiyo ayaana la bilaabaya gaynta lacagta ee Mudanayaasha.

### **HAB-MAALMEEDKA SHIRKA.**

**QODD: 25AAD:** Waxaan soo jeedinayaa in loo beddelo oo uu noqdo sidani, iyadoo xarafka (T) sidiisa ahaanayo & inta ka horaysa (B).

- b. Haddii Mudanuhu shirka khal-khal galiyo ama abuuro meel dhac & asluub xumo, ama gacan ka hadal isticmaalo, Guddoomiyuhu wuxuu leeyaaay 2-5 maalmood inuu shirka ka joojiyo. Haddii uu ka dhaga/adaygo 10 maalmood oo kale ayuu ku celinayaas Guddoomiyuhu.
- t. Hadii Mudanaha sharafkiisa meel lagaga dhaco, Mudanahaasi waxa uu ka codsankaraa Guddoomiyaha shirka, Guddi soo baadha meel ka dhacaa in loo saaro.

**QODD: 26AAD:** Waxaanu soo jeedinaya in loo bedelo oo uu noqdo sidani:

Iyada oo ka maqnaan shaha fadhiyada lagu muujin-doono diiwaanka xaadiriska Mudanayaasha oo la laabi doono 9:30 subaxnimo, waxaa Mudanaha ka maqnaada fadhiyada **Golaha** idan la'aan ka mudo ka yar labaatan (20) fadhi oo isku xiga ama muddo le'eg ama ka badan, Hasa yeeshaa aan isku xigin, lagu dhaqayaa sidan: -

- b. Maalinta 1aad ayaa la siinaya digniin af ah.
- t. Maalinta 2aad digniin qoraal ah
- j. Maalinta 3aad waxaa lagu soo dhigayaa looxa ogaysiiska.
- x. Maalinta 4aad waxa laga jarayaa ama laga (goynayaa) Gunada maalintaas.

Kh) Kal-fadhi kasta goonidiisa ayuu u samaynayaas Mudanaha anshaxa-marintiisa ku xusan xarfaha B,T & X,wixii maqnaansho ah ee uu la yimaado, Shir-Guddoonku kal-fadhi kasta dhammaad kiisa ayuu **Goluuhu** usoo bandhigayaa maqnaansha Mudanayaasha & arrinta la siiyay mudana kasta.

d. Sanadkii marka maqnaanshihiiba la isu-geeyo haddii ay gaadho Mudanaha maqnaan shihiisu lixdan maalmood (60maalmood), waxa loo aqoonsanayaa Mudane xilkiisii gudan waayay, waxaana qabanaya qoddobka 50aad Dastuurka & 68aad xarafkiisa laad, **Golaha** ayaana la gaadhaya go'aan kama dambays ah kadib marka uu shir-Guddoonku soo hor dhigo.

r. Lacagta laga jaro Mudanaha maalinta uu maqnaado, waxaa lagu reebayaa oo lagu haynayaa xisaabta **Golaha Guurtida** uga furan Baanka.

**F/gaara 1:** - wax-ka- badalkani waxa lagu ansaxiyay kalfadhiga 6aad ee **Golaha Guurtida JSL.**

**F/gaara 2:** - waxa ku lifaaqan xeer-hoosaadkani qeexida waajibaadka Guddi-Hoosaadyada **Golaha Guurtida JSL.**


### **Allaa Mahad Leh**

**Guddiga Joogtada ah ee Golaha Guurtida JSL.**

### **Saxeexa Shir-guddoonka Golaha**

- 1. Sh. Ibraaim Sh. Yuusuf Sh. Madar Guddoomiye**
- 2. Sh. Axmed Sh. Nuux Fure Gudd-ku-xigeenka 1aad**
- 3. Siciid Jaamac Cali Gudd-ku-xigeenka 2aad**
- 4. C/laahi Ibaarim Habane Xoghayaha Guud**

WAAJIBAADKA GUDDI-HOOSAADYADA GOLAHA  
GUURTIDA JSL



Shir-gudoonka **Golaha Guurtida** JSL, isagoo ka shidaal qaadanaya Dastuurka JSL Qodd.60aad Xubintiisa 1aad & Xeer-hoosaadka **Golaha Guurtida** Qoddobadiisa 4aad, xarfaha Kh & D Qoddobka 7aad xarafkiisa X, Kh, D, waxa uu halkan ku muujinayaa dhismaha Guddi-hoosaadyada & qeexida xilalkooda

**1. TILMAANTA GUUD EE GUDDI-HOOSAADYADA.**

- b. Guddi-hoosaadyada **Golaha** waxa loo igmaday fududayta gudashada xilalka & waajibaadka Dastuurku u gaar yeelaya **Golaha Guurtida**.
- t. Tirada Guddi-hoosaadyadu, waajibaadkooda, awoodooda & xil-gudashadoodu waa hadba sida ku cad xeer-hoosaadka. Sida ku cad qoddobka 60aad ee Dastuurka tirda Guddi-hoosaadyadu waxay ku salaysan tahay hadba **Goluhu** inta ka dhigto. Magacaabida & ka saarida xubimada Guddi-hoosaadyada waxay gaar u tahay shir-guddoonka, si waafaqsan Xeer-hoosaadka **Golaha**.
- j. Shir-gudoonka ayaa u xil saran xidhiidhinta Guddi-hoosaadyada & laamaha ama hay'adaha dawlada & Goloyaasha kaleba.
- x. Gudoomiyayaasha Guddi-hoosaadyada waxa ku waajib ah inay war-bixin hawl-galada guddiyada u soo gudbinayaan Shir- Guddoonka si loobaahiyo amaba ajande looga dhigo, isla mar ahaantana ay soo raaciyaan xubnaha hawl galaya iyo kuwa kuwa aan hawl-gelin.

**2. XILKA GUUD EE GUDDI-HOOSAADYADA**

b. Xogolaal u kala noqoshada iyo tallo ka soo jeedinta hawlahaa ay gaar-gaarka u leeyihiiin.

t. si looga hor-tago iskahor-imaadka, murig & muran dhinaca awoodaha guddi-hoosaadyada, shir-guddoonka ayaa kala tilmaamaya meelaha iyo mararka uu waajibaadkooda & xilkoodu kulmaan.

j. Waxa mamnuuc ah in xubnaha Guddi-hoosaadyadu si aan sharciga & xeer- hoosaadka **Golaha** waafaqsanayn ubaahinayaan xogta Guddiga & war bixinta.

Sidoo kale in ay arimahaas uga faa'iidystaan dano gaar-ahaaneed.

x. Guddoomiyaha Guddi-hoosaadkasta waxa uu shir-gudoonka qoraal ahaan ugu gudbin doonaa wakhti lagu soo dhamays tirayo hawsha la fulinayo.

Kh) Dhamaanba xubnaha Guddigu way u siman yihiin hawl-galada gurmadada ah.

d. Xubinina maqaadan karto laba gunno isku mar qudha balse hal gunno ayuun buu leeyahay oo shaqo dheeraad ah.

### **3.WAAJIBAADYADA KALA DUWAN EE GUDDI HOOSAAYADA.**

Guddi-hoosaad waliba, wuxuu yeelanayaa waajibaad u gaara oo la xidhiidha hawsha loo igmaday, waxaanay tahay sidan: -

#### **3.1. GUDDI-HOOSAADKA NABAGALYADA & DIFAACA.**

b. Guddigan, wuxuu u xil-saaran yahay oo uu **Goluuhu** u igmaday Dabo-galka iyo la socodka habسامي u gudashada iyo taabo-galinta xasilooniida iyo amniga

(Enforcement of law and order). Sidoo kale xaqijinta iyo qiimayta siyaasada iyo Nabad-gelyada Difaaca Dalka.

t. Guddigan wuxuu arrimahasi kala xidhiidhi doonaa hay'adaha ku shaqada leh, sida Wasaarada Arrimaha Gudaha, Gaashaan-dhiga & Hay'adaha kale ee amniga ku shaqo leh.

j. Guddi-hoosaadkan waxay xil-gudashadiisu ku salaysan tahay Dastuurka, qoddobkiisa 123aad & 124aad IWM. Sidoo kale xeerarka kale ee dalka ee hawshooda khuseeya.

### **3.2 GUDDI-HOOSAADKA SIYAASADA.**

b. Guddigani wuxuu u xilsaaran tahay qiimayta iyo talo ka bixinta siyaasada Guud ee dalka. Sidoo kale xidhiidhka iyo iskaashiga dalalka shisheeyaha ama huwan-goboleed amaba ururo caalamiya lala yeelanayo, heshiisyada xukuumadu dalal shisheeye la gasho.

t. Guddigani wuxuu xilkiisu kala xidhiidhayaay hay'adaha ku shaqada leh, sida **Golaha** Wasiiradda, Wasaaradda Arrimaha Dibeda, Wasaaradda qorshaynta iyo xidhiidhka hay'adaha caalamiga ah IWM.

j. Guddigani waxay xil-gudashadooda ku salaysanayaan Dastuurka qoddobkiisa 10aad iyo xeerarka kale ee dalka ee hawshooda khuseeya.

### **3.3 GUDDI-HOOSAADKA DHAQAALAHAA.**

b. Guddigani waxa uu Golaha ugu xilsaaran yahay qiimaynta, ilaalintaa & ka tallo bixinta siyaasada guud ee hoggaaminta dhaqaalaha dalka.

t. Guddi-hoosaadkani dhaqaaluhu wuxuu hawlihiisa kala xidhiidhayaay hay'adaha dhaqaalaha & wax-soo-

saarka, sida Maaliyada, Ganacsiga, Warshadaha, Kaluumaysiga & Horumarinta xeebaha, Dalxiiska, Macdanta & Biyaha, Beeraha, Horumarinta Reer Miyiga, Xanaanada xoolaha, Duulista Hawada & Gaadiidka Cirka, Bangiyada iyo dhamaanba meelaha ay ka soo baxdo cashuur dawladeed.

j. Guddi-hoosaadka dhaqaaluhu wuxuu xil-gudashadiisa ku salaysanayaa Dastuurka, qoddobkiisa 11aad, 12aad, 13aad, 14aad & xeerarka kale ee dalka ee hawshooda khuseeyaa.

### **3.4 GUDDI-HOOSAADKA ARRIMAH A BULSHADA.**

b. Guddi-hoosaadkani waxa uu Goluhu u igmaday qiimaynta iyo tallo ka bixinta siyaasada guud ee daryeelka iyo arrimaha adeegyada iwm.

t. Guddigani waxa uu hawlifiisa kala xidhiihayaa hay'adaha u xil saaran adeegyada bulshada iyo daryeelka, kana mid yihiin hawlaha Guud iyo Guryaynta, Boosta iyo isgaadhisiinta, Wax-barashada, Caafimaadka, Cadaalada, Diinta & Aw qaafta, Warfaafinta & Wacyigalinta, Hidaha, Dib-u-dejinta, Hay'ada Shaqaalaha Dawlada iyo wixii kale eek u lug leh adeegyada Bulshada iwm.

j. Guddi-hoosaadkani waxa ay xil-gudashadoodu ku salaysan tahay Dastuurka qdobadiisa 15aad, 16aad, 17aad, 18aad, 19aad, 20aad & xeerarka kale ee dalka ee hawshooda khuseeyaa.

### **3.5 GUDDI-hoosaadka Shuruucda & Garsoorka.**

b. Guddigani, waxay u xil-saran tahay qiimaynta, la socodka iyo tallo ka bixinta hasami u socodka hawlaha iyo xilka waaxda garsoorku u hayso Qaranka.

t. Waxa kale oo ay Guddi-hoosaadkani u xilsaaran tahay ka tallo bixinta shuruucda iyo xeerarka ka yimaada Golaha Wakiilada amaba ay mudanayaal **Golaha** ka tirsani u soo bandhigaan **Golaha Guurtida** si waafaqsan Dastuurka iyo xeer-hoosaadka **Golaha**.



j. Guddigu waxay hawlaheeda kala xidhiidhi doontaa hay'adaha ku shaqada leh sida Waaxda Garsoorka, Golaha Wakiilada, Guddiga Cadaalada, Wasaarada Cadaalada, Wasaada Diinta & Aw-qaafta, Madaxtooyada & Xeer-ilaalita Guud ee Qaranka iwm.

### **Allaa Mahad Leh**

#### **XUBNAHA SHIR-GUDDOONKA GOLAHA GUURTIDA** **QARANKA JSL.**

1. Mudane Sh. Ibraaim Sh. Yuusuf Sh. Madar      Guddoomiye
2. Mudane Sh. Axmed Sh. Nuux Fure      Gudd/ku/xigeenka laad
3. Mudane Siciid Jaamac Cali      Gudd/ku/xigeenka Zaad
4. C/Iaahi Ibaarim Habane      Xoghayaha Guud